CITY OF LEWISTON
RECREATION
65 Central Avenue
Lewiston, Maine 04240
207-513-3005
www.lewistonrecreation.com

## Waaxda Madadaalada Lewiston

# Foomka Xubinta Barkada Dabaasha Beerta Nasashada 2026 Kennedy

Barnaamijka Biyaha Xagaaga Waaxda Madadaalada Magaalada Lewiston waxa uu siiyaa aag furan oo ay ku dabaashaan dhalinyarada, oo bilaash ah. Barkada dabaashu waxay furnaan doontaa Arbacada - Jimcaha laga bilaabo Juun 25 - Agoosto 15. Dhamaan ka qayb galayaashu waa inay xareeyaan foomka xubinimada ee wakhtigan si ay uga qayb galaan.

Siyaasadaha Barkada Dabaasha Beerta Nasashada Kennedy:

- Barkada dabaasha waxaa la xidhi doonaa intay jirto hawada xumi.
- Lama ogola Iska Taagtaagnaan, Or-orod, Boodbood, ama Quusid, aaga ama gudaha barkada dabaasha.
- Caruurta xidhata xafaayadu waa in loo xidhaa xafaayad ayna biyu ka tafaynin si ay u dabaashaan. (Waxaa laga siiyaa xafiiska barada dabaasha $1)
- Lagama ogola waxa lagu ciyaaro ee biyaha, lagu sabeeyo, ama kaajeda aan lagu sabeeyo barkada dabaasha.
- Lama ogola jiinis barkada dhaxdeeda ama kabobiyaha dhaxdooda.
- Lama Ogola Afxumada.
- Dadka imanayaa waa inay qadariyaan DHAMAAN xubnaha shaqaalaha. Xubnaha shaqaalaha waxay xaq u leeyihiin inay ka saaraan dadka meesha yimid hadii loo baahdo.
- Lama ogola Sigaarka, cuntada, xanjada aaga barkada dabaasha.
- Caruurta ka yar 10 waa in la ilaaliyaa.
- Caruurta aan buuxin shuruudaha dherarka loo baahan yahay lama ogola inay barkada galaan.

---

Waxa aan ogolaaday in aan raaco shuruucda iyo siyaasada barkada dabaasha. Waxa aan fahansanahay inay jiraan ciqaab ay leedayahay oo ay sameeyaan shaqaalaha barkadu, hadii shuruucdan la jabiyo. Shaqaalaha Barkada Kennedy iyo Waaxda Madadaalada Magaalada Lewiston waxay xaq u leeyihiin inay diidaan adeegyada, ama ka saraan barnaamijka, qof kasta oo aan raacin shuruucdan.

**Fadlan qor liiska xubnaha qoyska ee isticmaali doona Barkada Dabaasha Beerta Nasashada Kennedy:**

Ilmaha 1:______________________________ taariikhda dhalashada: __________

Ilmaha 2: ______________________________ taariikhda dhalashada: __________

Ilmaha 3: ______________________________ taariikhda dhalashada: __________

Ilmaha 4: ______________________________ taariikhda dhalashada: __________

Ilmaha 5: ______________________________ taariikhda dhalashada: __________

Ilmaha 6: ______________________________ taariikhda dhalashada: __________

## Macluumaadka Waalidka/Koriyaha Sharciga ah

Magaca Waalidka/Koriyaha: ______________________________

Cinwaanka: ______________________________

Lambarka Taleefanka: _______________ Lambarka Taleefanka Labaad: _______________

Qofka Xaalada Degdega ah Lala Xidhiidhayo: ____________ Lambarka Taleefanka: ____________

Saxeexa Waalidka/Koriyaha ______________________________ Taariikhda: __________

CITY OF LEWISTON RECREATION

## Waaxda Madadaalada Magaalada Lewiston

# Foomka Ka Tanaasulka Guud iyo Khasaaraha

Markii aan eegey ka qayb galkayga ama ka qayb galka ilmaha kor lagu sheegey magiciisa (hadii ilmaha la sheegey uu ka yar yahay 18 jir), aniga oo matalaya naftayda ama matalaya ilmaha kor lagu sheegey hadii uu ka yar yahay 18 jir, waxa aan halkan kaga dhaafayaa Magaalada Lewiston oo aan sheegayaa in aanan ku dacwaynaynin Magaalada Lewiston, shaqaalaheeda, macalimiinteeda, ama wakiiladeeda wax kamid ah, wixii ka yimaada wakhtigan iyo mustaqbalka ee sheegasho ah ee uu keeney dayacaad dhanka Magaalada Lewiston iyo Waaxda Madadaalada ama cid kale oo waxyeelo hanti, dhaawac shakhsi ahaaneed, ama dhimasho khaldan, ama siday doonto wax ha u dhacaan. Waxa aan halkan ikhtiyaarkay kaga dhaafayaa dhamaan sheegashooyinka ay keentey dayacaada Waaxda Madadaalada iyo shaqaalaheeda, macalimiinteeda ama wakiiladeeda, ee iminka iyo mustaqbalka ee aan gudbin karo aniga, qoyskayga, hantidayda, cida i dhaxlaysa, cidaan u dardaarmo, ama cida aan wax u wakiisho. Sidoo kale, waxa aan la socdaa in ka qayb galka barnaamijka leh dhaqdhaqaaqa jidhku inuu yeelan karo culays wadnaha ah iyo jidhka ay kaas oo keeni kara xanuun ama dhaawac. Waxa aan fahansanahay in ka qayb galka barnaamijyada qaar madadaalo ay leedahay khataro, ay ku jiraan laakiin ayna ku xadidnayn dhimasho, dhaawacyo daran oo qoorta iyo lafdhabarta ah oo keeni kara in gabi ahaan ama qayb ahaan jidhku laxaad beelo, waxyeelo maskaxeed, iyo dhaawac aad u daran oo dhamaan lafaha ah, laalaabatooyinka, murqaha, iyo nugyada gudaha iyo in agabka loo keeney ilaalinta caruurta inayna ku filnaan inay ka baajiyaan dhaawaca daran. Waxa aan sidoo kale fahmay in barnaamijkan uu leeyahay khatar sare oo dhaawac jilibka, madaxa iyo qoorta soo gaadha ah. Waxa aan fahansanahay in ka qayb galka barnaamijyada Waaxda Madadaalada Lewiston ay ku jiraan hawlo shil, oo ay ku jiraan, laakiin ayna ku koobnayn, inta loo socdo iyo laba imanayo hawlo gaar ah, ka qayb galka hawlo goobaha ah oo kaalmo caafimaadna si wanaagsan looga heleynin, iyo ficilka aan laga taxadirin oo dadka kale ee ka qayb galaya ah. Waxa aan aniga (ilmahaygu) iskaayo u ogolaanay in aan ka qayb galo hawshan aniga oo og khatarta ku duugan oo waxa aan halkan ku ogolaaday dhamaan khatarta ka iman karta ee waxyeelo hanti, dhaawac shakhsi ahaaneed ama dhimasho. Hadii aan ku dhaawacmo anigu/ilmahagaya/qoyskaygu ama ku xanuunsado inta aan ka qayb galayo hawlaha gaarka ah, barnaamijka ama munaasabad, waxa aan halkan ku ogolaanayaa wixii daryeel caafimaad ah iyo adeegyada loo baahan yahay ee xaalada ku saxan dhaawaca ama daawaynta xanuunka/dhaawaca. Hadii ka qayb galaha dhaawacmay/xanuunsaday uu ka yar yahay 17, waxa aan fahansanahay in barnaamijku uu isku dayi doono inuu isoo ogaysiiyo isla markaba isaga oo isticmaalaya lambarka taleefanka aan siiyay. Marka aan naftayda, ilmahayga, ama qoyskayga u duwaan geliyo wixii munaasab Magaalada Lewiston, Waaxda Madadaalada, waxa aan halkan ku siiyay ogolaanshaha sawirkayga in la iga qaado kaas oo qayb ka ah barnaamijka. Sawirkan waxaa loo adeegsan karaa in kor loogu qaado barnaamijyada Waaxda Madadaalada Lewiston, munaasabadaha, iyo hawlaha. Magaalada Lewiston, ficilka Waaxda Madadaalada Lewiston, kama masuul aha wixii dhaawacyo ah ama hantida la waayo ee qof kasta inta la ciyaarayo, lagu jiro ama qaab kale ee kamidka ah barnaamijyada Waaxda Madadaalada Lewiston waxay doonto ha noqoto sababtu, oo ay ku jiraan dayacaada caadiga ah oo ka timaada Waaxda Madadaalada Lewiston, wakiiladeeda, ama shaqaalaheeda. Waxa aan sidoo kale ogolaaday in aanan waxba u raacin Magaalada Lewiston, Waaxda Madadaalada, iyo cida kale ee ku qoran dhamaan sheegashooyinka ka imanaya ka qayb galkayga ama ka qayb galka ilmaha kor lagu sheegey ama helitaanka tilmaamaha barnaamijka ama wixii hawlo ah ee shil keena, waxay doonto ha noqdaan ah ama siday doonto ha u dhacaan e. Waxa aan fahansanahay in ka tanaasulkan loogu talo geley inuu noqdo mid balaadhan oo wada jir ah sida uu dhigayo sharciga Gobolka Maine oo waxa aan ogolaaday in hadii wax kamid ah aanu saxnayn, in inta soo hadhay ee ka tanaasulku si buuxda loo dhaqan gelin doono oo uu wax ku ool noqonayo. Waxa aan sidoo kale ogolaaday in goobta wixii dacwad sharci ah ay noqonayso Maine. Waxa aan xaqiijinayaa in aniga ama waakilka iyo/ama koriyaha sharciga ee ilmaha kor lagu sheegey magiciisu hadii ilmuhu uu ka yar yahay 18 jir in aan ahay da'da qaangaadhka sharciga ah oo aan aniga oo xor ah saxeexay heshiiskan. Korona fayraska noofel, COVID-19, waxay bayaamisay inuu yahay safmar caalamka oo dhan ah Hay'ada Caafimaadka Adduunku. COVID-19 waxaa uu u faafaa si balaadhan oo waxaa loo arkaa inay dadku isku gudbiyaan. Sidaas darteed, dawlada caafimaadka federalka, gobolka, iyo dawlada hoose iyo hay'adaha federalka iyo gobolku waxay ku teliyaan in la kala fogaado, meelo badan, waxaa la mamnuucay inay dadku kusoo xoomaan. Waaxda Madadaalada Lewiston (Lewiston Recreation Department, LRD) waxay samaysay talaabooyin taxadir oo lagu yaraynayo faafitaanka COVID-19; laakiin, LRD ma damaanad qaadi karto in ka qaybgaluhu aanu qaadi doonin caabuqa COVID-19. Sidoo kale, ka qayb galka barnaamijka LRD waxa uu kordhin karaa khatarta lagu qaadayo COVID-19. Marka aan saxeexo heshiiskan, waxa aan qirayaa nooc faafitaanka COVID-19 oo waxa aan iskay u ogolaaday in aan khatarta dusha u rito naftayda iyo/ama caruurta ka qayb galaysa ee laga yaabo inay u dhawaacaan cid qabta ama qaadaan caabuqa COVID-19 marka ay ka qayb galaan Barnaamijka LRD oo u dhawaanshaha cida qabta ama caabuqa noocan ah waxa uu keeni karaa dhaawac, xanuun, laxaad la'aan iyo dhimasho shakhsiga ah. Waxa aan fahansanahay in khatarta in la qaado ama loo dhawaado cid qabta COVID-19 ee LRD ay ka iman karto ficilo, in aan la qaadin talaabooyinkii, ama daycaad naftayda ah iyo dadka kale ah oo ay ku jiraan, laakiin kuma koobna, shaqaalaha LRD, dadka wakhtigooda ku deeqa, iyo ka qayb galayaasha barnaamijka iyo qoysaska kale. Waxa aan iskay u ogolaaday in aan dusha u rito dhamaan khatarta la saadaalin karo oo waxa aan aqbalay masuuliyada wixii dhaawac ah ee ilmahayga(caruurta) iyo naftayda (oo ay ku jiraan, laakiin kuma xadidna, dhaawaca shakhsi ahaaneed, laxaad la'aan, iyo dhimasho), xanuunka, waxyeelo, wixii la waayo, sheegayo, khasaare, ama kharashka, nooca uu doono ha noqdee, ee aniga ama ilmahayga(caruurtayda) ay la kulmeen ama ay u galeen ka imaatinka ilmahayga(caruurtayda) ee barnaamijka LRD ("Sheegashooyin"). Aniga oo naftayda, iyo/ma caruurtayda matalaya, waxa aan halkan kaga dhaafayaa, oo aanan ku dacwayn doonin, oo aanan waxba u raacan doonin, Waaxda Madadaalada Lewiston iyo Magaalada Lewiston, shaqaalaheeda, wakiiladeeda, iyo hay'adaheeda, wixii Sheegashooyin ah, oo ay ku jiraan dhamaan khasaaraha, dalabyada, ficilada, waxyeelada, kharashaadka nooca ay doonaan ha noqdaan ah ee ka yimaada. Waxa aan fahmay oo aan ogolaaday in ka dhaafitaankan ay ku jiraan wixii Sheegashooyin ah ee ficilada, ficil aan la samaynin ama dayacaad ah ee Waaxda Magaalada Lewiston, shaqaalaheeda, hay'adaheeda, iyo wakiiladeeda, hadii ay uu dhaco caabuqa COVID-19 inta lagu jiro, kahor ama kadib ka qayb galkayga barnaamijyada LRD. Waxa aan akhriyay foomkan oo waxa aan si buuxda u fahansanahay in marka aan saxeexo foomkan, aanan ka tanaasulaynin wax xuquuqdayda sharci ah iyo ama waxa ay i siinayaan ee aan heleya hadii ay timaado dayacaad caadi ah ee Waaxda Madadaalada ama cidii kale ee ku qoran.

**Saxeexa (Hadii uu ka wayn yahay 18):** ______________________________ **Taariikhda:** ____________

**Saxeexa Waalidka (Ka qayb galaha 18 jirka ah):** ______________________________ **Taariikhda:** ____________

LEWISTON ME